

Agabka Bulshadda Gobolka New York

Isha Hagaida ee Dadka Muhaajiriinta Reer New York
Luulyo/Agoosto 2023



Isbahaysaiga Laanta Socdaalka New York waxay samaysay agan si loo siiyo ilo xubnaha bulshadda iyo shuraakadayada iyo gaashaan buurtayada la shaqeeya iyaga. Buugyarah si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa iyadoo lagu salaynayo beddelka sharciyada iyo xeerarka.

Narkii ugu dambaysay ee xogta la
cusbooneysiyyay waxay ahayd: 07.31.2023

Tusmadda

- Caafimaadka **3**
- Socdaalka **4**
- Waxbarashadda **7**
- Dimuqraadiyada **9**
- Dhaqaalaha **10**
- Garo Xuquuqdaada **11**
- Dembiyada Nacaybka ah **12**
- Ilaha NYS **13**

Caafimaadka



Ceymiska Caafimaadka

- Isbedel cusub ayaa socda oo wax ka bedelaya dadka heysta ceymiska Medicaid, Child Health Plus, iyo Essential Plan.
 - Tan iyo bilowgii 2020, dadka ka diiwaan gshan ceymisyadaas waxaa si toos ah loo kordhinayey ceymiskooda caafimaadka iyada oo la raacayo nidaamka dawlaadda dhexe ee la xiriira COVID-19.
 - Hase yeeshie, sharchiyo cusub oo dalwadda federaalka ah ayaa waajib kaga dhigaya gobolka NY inuu dib u bilaabo dib u qiimeyeenta dib u cusbooneysiinta dadka laga diiwaan geliyo barnamijiyadaas. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in lagaa doonayo in aad buuxiso codsi si dib loogu cusbooneysiyo ceymiskaaga caafimaadka xubnaha qoyskaaga.
 - Laga bilaabo xagaaga 2023, ogeysiiska dib u cusbooneysiinta ayaa loo soo dirayaa dadka is diiwaan gelinaya barnamijiyadaas iyo taariikhda is diiwaan gelinta. Ogeysiiska dib u cusbooneysiinta waxaa ku jira taariikhda ugu dambeysta qabashada codsiga iyo khatarta uu leeyahay ceymiska oo kaa dhaca. Taariikhda waa mid ku saleysan dhamaadka taariikhda is diiwaan gelinta taasoo u dhaxeysa 30ka Juun 2023 ilaa 31ka Maajo 2024.
 - Si uu Gobolka NY kuugu soo diro digniinta qoraalka ah si aadan u lumin fursadaha muhimka ah ee la xiriira ceymiska caafimaadka, oo ay ka mid tahay marka dib loo eegayo.
 - Fariinta START u soo dir 1-866-988-0327 (afka isbaanishaka, fariintu waa INCIAR)
 - Si aad u hesho maclumaad dheeraad ah, soo booqo info.nystateofhealth.ny.gov/COVID-19-Changes
- Diiwaangelinta Caymiska Caafimaadka ee Gobolka NY (NY State of Health) waxay sii furnaan doontaa illaa bisha Maajo 2024 si qof kasta oo laga gooyo caymiska caafimaadka ee Medicaid, Child Health Plus, ama caymiska Essential Plan inta lagu jiro mudada habka dib u go'aaminta waxaad awood u yeelan doontaa inaad iska diiwaangeliso Qorshaha Caymiska Caafimaadka Qualified Health Plan, haddii ay u qalmaan.

- Sidee la isu diiwaan geliyaa
 - Gargaar is diiwaan gelinta oo lacag ah ayaad codsan kartaa, adiga oo fool ka fool ula kulma ama telefoonka ku codsada. Qof ku caawiya ka raadso info.nystateofhealth.ny.gov/panavigatorsitelocations
 - Soo wac adeegga macaamiisha ee Waaxda Caafimaadka ee NY [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777).
 - Barta internetka ee nystateofhealth.ny.gov. Qoraal ayaad kula sheekeysan kartaa adeegga macaamiisha saacadaha ay shaqeeyaan si aad u buuxiso codsiga.
 - Dadka deggan Magaalada New York: soo wac [311](tel:311), fariin qoraal ah “CoveredNYC” to [877-877](tel:877-877), ama soo booqo on.nyc.gov/healthinsurance si laguu caawiyo ama u hesho maclumaad dheeraad ah.
- Maclumaad ku qoran luqadaha kala duwan waxa aad ka heli kartaa info.nystateofhealth.ny.gov/InformationalMaterials

Dhamaadka xaaladda Caafimaadka Dadweynaha ee Dawlaadda Dhexe

- Sanadkii 2020, dawaladda federaalku waxa ay ku dhawaaqday xaalad degdeg ah ee caafimaadka dadweynaha COVID-19 dartiis. Xaaladda degdeg ah ee caafimaadka dadweynaha waxa ay ku eg tahay 11ka Maajo 2023.
- Taasi waxa ay ka dhigan tahay in ay wax iska bedelayaan barnamijiyada ceymiska caafimaadka, iyo sidoo kale talaalka COVID-19, baaritaanka, iyo daaweynta.
 - Talaalka waxaa weli bixinaya ceymiska caafimaadka.
 - Helitaanka talaal lacag la'aan ah (adiga oo taga ama guriga aad isaga baarto) waa laga joojinayaa dadka intooda badan.
 - Magaalada NYC gudaheeda, qalabka baaritaanka ee guriga la isugu soo diro ee bilaashka ah wuu sii socon doonaa in la qaybiyo in ka badan 250 goobood oo socod lagu tagi karo, oo ay ku jiraan dhammaan maktabadaha NYC, inta aan la dhammaysan. Baaritanaka PCR iyo kan degdega ah ayaa sii socon doona in la helo, iyada oo aan loo eegayn in qof uu haysto caymiska caafimaad ama inta wadanka sharci uu ku joogo iyo in kale, NYC Health + Isbitaalada iyo goobaha cad ee Waaxda Caafimaadka ee COVID.
 - Daawada ay iibsatay dawlaadda federaalka weli lacag ala'aan ayaa lagu siinaya bukaanka ilaa ay ka dhamaato.
 - Inta ceymisku bixinayo waa kala duwan tahay waxayna ku xiran tahay nooca ceymiskaa caafimaadka ee aad heysato.

Socdaalka 1/3

Roxham Road way ka xiran tahay qaxootiga doonaya in ay galaan Canada


- 24kii Maarso waxa ay Mareykanka iyo Canada ku dhawaaqueen isbedel lagu sameynayo Heshiiska Waddan Sadexaad, kaasoo lagu ogaanayo dadka codsan kara magangelyada xuduudda u dhaxeysa Mareykanka iyo Canada.
- Laga bilaabo 25ka Maarso 2023 dadka Canada ka soo galaya Roxham Road iyo meelaha kale ee aan rasmiga aheyn ee laga talaabo xuduudda kama codsan karaan magan gelyo, haddii aysan ka soo bixin shuruudo gaar ah oo aysan cadeyn karin.
- Haddii aanu ka soo bixin shuruudaha, waxaa dib loogu celinaya Mareykanka mar dabana waligaa kama codsan karaan magangelyo Canada. Marka dib loo soo celiyo, waxaa suurogal in xabsiga la dhigo Mareykanka oo waliba dib loogu celiyo waddankii ay ka yimaadeen.
- Maclumaad dheeraad ah (ku qoran English, Spanish, iyo French) iyo talo ku saabsan xaaladaada, soo booqo bridgesnotborders.ca.

Nidaam cusub oo gaar u ah dadka u dhashay Kuubba, Haiti, Nicaragua, iyo Venezuela

- DHS waxa ay ku dhawaaqday nidaam cusub oo gaar oo u ogolaanaya dadka ud ahshay Kuuba, Haiti, Nicaragua iyo Venezuela iyo qoysaskooda, ay ku codsan karaan sharciga Mareykanka ee.
- Dadka ka soo baxa shuruudaha ee ku nool dibadda Mareykanka oo aan heysan dokumeenti loo tixgeliyo, iyada oo xaalad kasta gooni loo eegayo, lana siin karo ogolaasho ay ku soo safraan, si ku meel gaar ahna ugu noolaadaan Mareykanka muddo 2 sano ah iyada oo loo eegayo bini'aadminimada.
- Si aad uga qeyb qaadato nidaamkaas, codsadaha waa inuu heystaa qofka dhaqaale ahaan taageeraya Mareykanka. Waa in sidoo kale ay ku gudbaan baaritaanka taariikhda fal dambiyeedka iyo amaanka, kana soo baxaan shuruudaha ku xiran.
- Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkan, fadlan soo booqo uscis.gov/CHNV.

Maclumaad dadka dhawaanta yimid iyo kuwo magan gelyo doonka ah

- Waxaa jira hay'ado kala duwan oo qaabilسان arrimaha socdaalka iyo hijrada ee dawladda mareykanka. Hay'adda Socdaalka iyo Dhaqangelinta Sharciyada Socdaalka (ICE) waa hay'adda qaabilسان fulinta sharciyada, iyo Barnaamijka Kor Kala Socoshada Degdegga ah (ISAP), waa magaca barnaamijka ICE ee la socoshada dadka soo haajira.
- Dadka qaar ayaa laga doonayaa in ay la xiriiraan ICE ama ISAP taasoo qeyb ka ah dacwadocda. Haddii aad Mareykanka ku soo gashay adiga oo ka soo talaabaty xuduudda ka dibna lagu xiray, ama lagu xiray xilli ka mid ah marka aad soo gashay Mareykanka, waxaa suurogal ah in lagaa doonayo in aad iska diiwaan geliso ICE ama ISAP.
- Maclumaad dheeraad oo ku saabsan nidaamka is diiwan gelinta, soo booqo:
 - help.asylumadvocacy.org/faqs-ice-isap (English)
 - apoyodeasilo.org/preguntas-frecuentes-ice-isap (Spanish)
- Haddii aad guurto, waa muhim in aad wargeliso cinwankaaga cusub dawladda Mareykanka. Si aad u hesho qoraalada rasmiga ah ee laguu soo diro ee balamada dhageysiga maxkamadda iyo wareysiga. Waxaa lagaa doonayaa in aad cinwaankaaga la socodsiiso hay'ad kasta oo socdaalka ah oo xiriir idin dhex maray.
- Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan guuritaanka iyo sida cinwaankaaga loo soo sheego, soo booqo:
 - help.asylumadvocacy.org/faqs-moving-traveling (English)
 - apoyodeasilo.org/preguntas-frecuentes-mudanza-viajes (Spanish)
- Laga bilaabo 31ka bisha Maajo, 2023, USCIS waxay beddeshay goobta lagu xareynayo codsiyada magangelyo ee qaar oo boostada lagu gudbin jiray. Diwaangelinta khadka tooska ah ayaa la heli karaa oo waan la dhiirigelinaya codsadayaasha aan ku jirin dacwadaha maxkamadda socdaalka oo aan ahayn inay codsigooda u gudbiyaan Xarunta Asylum Vetting Center.



Socdaalka ^{2/3}

Talaabo Laga Qaado oo Dib Loo Dhigay Dadka

Caruurninada ku Yimaada Mareykanka (DACA)

- 5Tii Oktoobar 2022 Maxkamadda racfaanka ee Louisiana ayaa go'aan ku gaartay in DACA uusan hayen barnaamij sharciga waafaqsan marka la eego sida iminka loo dhaqan geliyey. Maxkamadda racfaanku waxa ay dacwadda dib ugu soo celisay Maxkamadda Degmada ee texas si ay u tixgeliso shariyada Maamulka Biden ee DACA 2022, kaasoo la filayo inuu dhaqan galoo 31ka Oktoobar 2022.
- Dacwad ayaa socota, sidaa darteed waxaa suurtogal ah in isbeddello dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka.
- Inta ka horeysa DHS waxa ay qabaneysaa oo ka shaqeyneysaa codsiyada cusbooneysiinta DACA (oo ay ka mid yihiin codsiyada ogolaashaha shaqada iyo kor kala socoshada). DHS ma qabaneysa mana ka shaqeyneyso codsiyada DACA ee ugu horeeya.
 - Haddii hadda aad haysato DACA, sharcigaaga weli waa ansax.
 - Haddii DACA -gaagu dhowaan uu dhoco, hadda cusboonaysii!
 - Haddii aad markii ugu horeysay u gudbisay USCIS codsi DACA ah oo aan weli la aqbalin, codsigaas waa la joojin doonaa. La ma socod siin doono ilaa ogeysiis dambe.
- Shakhxiyaadka hore u helay Talaabada dib-loo-dhigay ee Timaanshiyaha Carruurnimada (DACA) hadda waxay buuxin karaan foomamka I-821D (codsiga cusboonaysiinta DACA) iyo I-765 (codsiga cusboonaysiinta oggolaanshaha shaqada) ee qatka interneetka.
 - Awooddan waxaa loogu talagalay kuwa hadda ku jooga ama haysta DACA ama DACA koodu dhacay wax ka yar sannad ka hor.
 - Wixii maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo cusboonaysiyo DACA qatka interneetka: uscis.gov/humanitarian/renew-your-daca



Xaaladda Ku Meel Gaarka Ah Ee Sharcigu Ilaliiyey (TPS)

yo Dib U Dhigista Ka Saaridda Waddanka (DED)

- Waxaa laga yaabaa in dawladda Mareykanku ay wadamada qaarkood u ogolaato TPS, haddii xaalado gaar ah dartood, sidaas dagaalo ka socda ama dhibaatooyin dabiici ah, taasoo aysan suurogal aheyn in ay wadankooda dib ugu noqdaan.
- Mudada ay xaaladaas ku jiraan, dadka codsada oo loo ogolaado TPS:
 - Waxaa laga badbaadiyaa in waddanka laga saaro.
 - Wuxuu ay heli karaan ogolaashaha shaqada iyo lambarka bulshada
 - Waxaa suurogal ah in loo ogolaado in ay safri karaan
 - Ma soo xiri karaan DHS sharciga uu waddanka ku joogo dartiis
- TPS waa xaalad ku meel gaar ah oo aan keeni karin deganaasho rasmi ah. Hase yeeshi, dadaka heysta TPS waxa ay codsan karaan waxyaabaha faa'iidada ah ee socdaalku bixiyo ama dadka aan sharciga waddanka ku aheyn xaqa u leeyihii.
- Wadamada xilligan loo ogolaaday TPS waa:
 - Afghanistan, Burma (Myanmar), Cameroon, El Salvador, Ethiopia, Haiti, Honduras, Nepal, Nicaragua, Somalia, Sudan, South Sudan, Syria, Ukraine, Venezuela, Yemen
- Maclummaad waddan kasta ku saabsan, shuruudaha ku xiran, mudada is diiwaan gelinta, iyo xogtii u damebysay, halkan ka hubi uscis.gov/TPS.
- Dhammaan codsadyaasha TPS waxay hadda buuxin karaan Foomka I-821, Codsi Xaaladda Ilalisan ee Ku Meel Gaarka ah, onlayn at uscis.gov/i-821.
- 21 juun 2023, waxa ay DHS ku dhawaaqday in 18 bilood lagu kordhiyey dadka heysta sharciga ku meel gaarka ah ee ka soo jeeda El Salvador, Honduras, Nepal iyo Nicaragua. Si loogu kordhiyo mudada, waa in ay dib isu diiwaan gelyaan muddo 60 maalmood gudahood ah iyaga oo raacaya shariyada laga soo saaray waddanka ay u dhasheen.

Socdaalka 3/3

Isbedel lagu sameeyey nidaamka bixinta damaanadda ee xafiiska socdaalka

- 20Kii Abril 2023, waxa ay ICE ku dhawaaqday barnaamijka ay Lacag Caddaan Ah Oo Damaanadda (CeBONDS) barta internetka looga bixin karo loona diri karo ICE halkii ay geyn lahaayeen xafiiska degaanka ICE.
- Si loo bixiyo lacagta damaanadda ah, waa in qofka damaanadda bixinayo xisaab ka furtaa CeBONDS ee bogga ICE, xaqijiyyaa aqoonsigiisa iyo sharciga uu waddanku ku joogo, oo dhemystiraa heshiiska damaanad bixiyaha, Foormka I-352. Dadka heysta dhalashada Mareykanka, heysta deganaashaha rasmiga ah, qaar ka mid ah hay'adaha aan faa'iido doonka aheyn, iyo xafiisyada qareenada ayaa bixin kara lacagta damaanadda ah iyaga oo isticmaalaya CeBONDS.
- ICE waxa ay caddeeyeen in ay sii wadi doonaan in ay la shaqeeyaan dadka damaanadda lagu xiro iyaga oo xaalad xaalad u eegaya dadka doonaya in ay damaanadda ka bixiyaan xafiiska degaanka ee ICE. Xaaladaas oo kale, la soo xiriir xafiiska kuugu dhow ee ICE si ay talo kuu siiyaan.
- Si aad u hesho maclumaaad dheeraad ah, soo booqo [ice.gov/bonds](#).


Tilmaamaha Soo Booqashada Goobaha Lagu Hayo

Dadka u Xiran Socdaalka

- 11 Maajo (May) 2023, waxa ay ICE soo saartay tilmaamaha iyo nidaamka cusub ee wixii ka dambeeyey "Cudurka Dilaacay" kaasoo si buuxda dib loogu soo celinayo booqashada dhamaan goobaha dadka lagu hayo ee socdaalka.
- Goobaha heysta aqoonsiga "cagaaran (green)" ma laha wax xadidaad ah, halka xarumaha heysta aqoonsiga "casaanka (red)" lagu doonayo in dadka booqanaya ay xirtaan af dabool oo la xadido lambarka dadka booqanaya dadka xiran.
- Booqashada kombiyuutarada iyada oo meel la kala joogo waa hab kale oo dheeraad ah oo la isticmaali karo, laakiin laguma bedelayo booqashada fool ka fool ka ah.
- Si aad u ogaato xaaladda xabsiga dadka lagu hayo, fadlan booqo "Goobta laga socdo xarumaha" ee [ice.gov/coronavirus](#).

Ilaha loogu talagalay qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira

- Taariikhdu markay ahayd 8da bisha Juun, 2023, DHS waxay ku dhawaaqday hannaan cusub oo awood u siinaya muwaadiniinta Afgaanistaan inay cusbooneysiyaan sii-daynta sharafeedkooda oo ay ku sii noolaadaan kana shaqeeyaan Mareykanka
 - Muwaadiniinta Afgaanistaan ah ee hadda sii-daynta ku jooga waxay hadda codsan karaan cusboonaysiinta sii-dayn ku sii jooga iyo oggolaanshaha shaqada iyada oo loo marayo hab cusub oo codsi lacag-la'an ah, oo laga heli karo onlayn iyo warqad, kaas oo isticmaalaya Foomka I-131, Codsiga Dukumentiga Safarka (Travel Document).
 - Sidoo kale DHS waxay tixgelin doontaa laba sano oo dheeraad ah sii-daynta sharafeed ee Afgaanistaan sii-daynta sharafeed ee codsanaya magan-gelyo ama hagaajinta heerka deganaanshaha rasmiga ah ee sharciga ah. Haddii kordhinta la ogolaado, codsadaha ogolaanshihiisa shaqo ee asalka ahaa waa la kordhin doonaa waxaana loo diri doonaa ciwaanka ugu dambeeyaa ee diiwaanka USCIS.
 - Muwaadiniinta Afgaanistaan waxaa lagu dhiirigelinaya in ay sii wataan sharci joogto ah oo ay ku joogaan Maraykanka oo ay ku jiraan soogalootiga gaarka ah iyo hababka magangalyada.
 - Wixii maclumaaad dheeraad ah, booqo [uscis.gov/humanitarian/information-for-afghan-nationals/re-parole-process-for-certain-afghans](#).
- Ilaha Dowladda Federaalka:
 - Hagidda dadweynaha USCIS ee loogu talagalay reer Afgaanistaan:
[uscis.gov/humanitarian/information-for-afghans](#)
 - Ilaha Kaalmada Reer Afgaanistaan ee dhammaan dawladda dhexe oo uu soo diyaariyay Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga:
[acf.hhs.gov/orr/programs/refugees/afghan-assistance-resources](#)



Waxbarashadda 1/2

Balaarinta Barnaamijka Canshuur Dhaafka Caruurta

- Canshuur Dhaafka Caruurta ee Gobolka, canshuur dhaafka dheeraadka ah ee Gobolka New York, waxaa la kordhiyey sanadkan si loogu daro caruurta da'doodu ka yar tahay 4 sano markii ugu horeysay.
- Haddii ay kula nool yihiin caruur da'doodu ka yar tahay 18 oo aad canshuur xareyso, waxa aad xaq u leedahay in canshuur laguu soo celiyo marka xiga oo aad canshuurta xareyso.
- Waxaa xusid mudan, in canshuurka dhaafka ay xaq u yeelan karaan waalidka isticmaalka Lambarka Aqoonsiga Canshuuraha Ee Qof u Gaarka Ah (ITIN).
 - Xareynta Canshuurta Lambarka Aqoonsiga ee Canshuurta
 - ITIN waxaa codsan kara dadka doonaya lambarka aqoonsiga ee xareynta canshuurta laakiin aan laheyn ama aan ka soo bixin shuruudaha lagu bixiyo lambarka bulshada (SSN). Lahaashaha ITIN waxa ay qofka fursad u siineysaa inuu xareyn karo canshuur oo heli karo canshuur dhaaf haddii uu ka soo baxo shuruudaha.
 - Fadlan ogaada in lagu siiyo oo laguu ogolaado ITIN waxa ay qaadan kartaa dhawr bilood, sidaa darteed waa in aad horay u codsataan halkii aad sugi lahaydeen xilliga soo socda.
 - Si xog dheeraad ah uga ogaato sida loo codsado, canshuur dhaafka aad xaqa u yeelan karto, iyo waxyaabaha kale ee ITIN la xiriira, soo boqo taxoutreach.org/tax-filing/itin
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Canshuur Dhaafka Caruurta ee Gobolka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ee caruurta, soo booqo tax.ny.gov/pit/credits/empire_state_child_credit.htm

Maamulka Waxbarashada Dugsiyada (3K-12)

- Gobolka New York waxa uu u balan qaadaya, iyada oo aan loo eegin sharciga uu waddanka ku joogo, inuu helo waxbarasho tayo sare leh oo lacag la'aan ahлага bilaabo xanaanada caruurta ilaa ay ka qaataan shahaadada dugsiga sare, ama ay dhaafaan da'da lagaga baxo dugsiga sare ama ardaygu gaaro 21 sano.
- Qoysaska waxaa loo damaanad qaadaya in loo tarjumo dhamaan qoraalada ay ku jiraan macluumaadka muhimka ah looguna tarjumo waqtiga ku haboon.
- Ardaydu waxa ay codsan karaan oo ay iska diiwaan gelin karaan Dugsiyada Dadweynaha ee NYS sanadka oo dhan, iyada oo laga yaabo in ay kooban tahay waxyaabaha ay kala dooran karaan mudada ka baxsan isdiwaan gelinta rasmiga ah.
- Dugsiyada dadweynuhu ma weydiin karaan ardayda sharciga ay waddanka ku joogaan mana la waadagi karaan macluumaadka ardayda barnaamijyada caadiga ah. Qaar ka mid ah barnaamijyada xilliga hore ee waxbarashada caruurta ee saacadaha dheeraadka ah shuruudo la xiriira sharciga waddanka ku joogaan iyo dakhliga soo gala qofka.
- Macluumaadka maamulka Waxbarashada Dugsiyada ee Magaalada New York
 - Macluumaad ku saabsan sida loo codsado tarjumada qoraalka ah iyo tan afka ah ee Maamulka waxbarashada Dugsiyada, soo booqo schools.nyc.gov/hello ama soo wac 718-935-2013.
 - Macluumaad dheerad ah oo ku saabsan nidaamka ogolaashaha, ka akhriso "Tilmaamaha Is Diiwaan Gelinta 2023 ee NYC," oo ku qoran 9 luqadood schools.nyc.gov/admissions.
 - Si aad u ogaato oo aad u codsato Dugsiyada Dadweynaha ee NYC soo booqo myschools.nyc, soo wac 311, ama booqo Family Welcome Center (Xarunta Soo Dhaweynta Qoysaska) si laguu caawiyo. Xarumaha Family Welcome Center waxa aad ka heleysaa halkan schools.nyc.gov/fwc.



Waxbarashadda 2/2

Balanqaadka NYC ee gargaarka heynta caruurta

- Janaayo 2023, waxa ay Magaalada New York bilowday barnaamij cusub oo qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee aan laheyn sharciga wadanka ama aan heysan dhalashada ay ka heli karaan adeegga heynta caruurta, kuwaas oo aan markii hore loo ogoleyn sharci la'aanta darteed.
- Barnaamijka dib ayaa loo cusbooneysiyyey waxaana taageero ka helaya 600 caruur ah Luulyo 2023 ilaa Juun 2024.
 - Waxaa laga yaabaa in ay qoysasku ka soo baxeen shuruudaha haddii ay:
 - Aysan ka soo bixin shuruudaha barnaamijyada kale ee bixiya kharashka heynta caruurta.
 - Heystaan caruur da'doodu u dhaxeyso 0-13
 - Dakhliga guud ee qoysku ka hooseeye 300% heerka qiyasta faqriga ee dawladda dhexe
- Qoysaska waxaa lagu dhiiri gelinaya in ay u codsadaan sida ugu dhakhsaha badan iyaga oo u si maraya hay'adaha bulshada ee loo xilsaaryay:
 - Bronx iyo Manhattan: Northern Manhattan Improvement Corporation ([212-822-8300](tel:212-822-8300), nmic.org/promisenyc)
 - Brooklyn: Center for Family Life ([718-438-9500](tel:718-438-9500), centerforfamilylife.org)
 - Staten Island: La Colmena ([718-442-7700](tel:718-442-7700), lacolmenanyc.org)
 - Queens: Chinese-American Planning Council ([718-358-8899](tel:718-358-8899), cpc-nyc.org)



Kaalmada Daryeelka Ilmaha

- Miisaaniyada dowladda Gobolka New York ee sanadkan waxaa ku jiray balaarinta kaalmada daryeelka ilmaha (child care) kuwa sameeya 85% dakhliga dhexe ee gobolka. Qiyaastii 100,000 oo qoys oo dheeraad ah ayaa hadda xaq u yeelan doona inay ka qaybqataan Barnaamijka Kaalmada Xannaanada Carruurta.
- Isbeddelada barnaamijka waxaa ka mid ah kuwan soo socda:
 - Qoysaska helaya ilaa 85% dakhliga dhexe ee gobolka ayaa hadda xaq u yeelan doona.
 - \$63,416 qoys ka kooban 2
 - \$78,337 qoys ka kooban 3
 - \$93,259 qoys ka kooban 4
 - \$108,180 qoys ka kooban 5
 - \$123,101 qoys ka kooban 6
 - Kharashyadu waxay ku koobnaan doonaan boqolkiiiba 1% ee wadarta dakhliga qoyska ee ka sarreeya khadka faqriga ee qoysaska ka qayb qaadanaya.
 - Tirada maqnaanshaha sanadlahaa ah ee la ogol yahay waxay ka badan doontaa 24 ilaa 80.
- Macluumaad dheeraad ah iyo si aad u aragto haddii aad awoodid inaad ku hesho daryeelka ilmaha qimo jaban ama aan lahayn, booqo ocfs.ny.gov/ccap.

Kaalmada Dhaqaale ee Kulliyada iyo Xeerka NYS DREAM

- Ma u baahan tahay lacag kulliyad? Talaabadaada ugu horeysa waa inaad buuxiso Codsiga Bilaashka ah ee Dawlada Dhexe ee Kaalmada Ardayda (Free Application for Federal Student Aid) (FAFSA). Hadda waa waqtigii la bilaabi lahaa: lacagta federaalka iyo dawlad-goboleedka ayaa marka hore timid, marka hore la adeego. Ka codso studentaid.gov/FAFSA.
- Si aad caawinaad uga hesho UnderstandingFAFSA.org, nog internetka ah oo aad ka heli karto tilmaan guud iyo goobaha ay ganacsiin ka heli karaan ardayda iyo qoysaska doonaya lacagta waxbarashada.
 - Talo siinta lacag la'aanta ah ee FAFSA ee Gargaarka Maaliyadda ee Ardayda oo ku qoran ilaa 10 luqadood.
 - Bogga waxaa ku jira sida ardayda iyo qoysaska qaxootiga ah ee aan sharci ku laheyn waddanka.
- Senatoore José Peralta Sharciga Gobolka New York wuxuu ardayda aan sharciga aan haysan iyo ardayda kaleba wuxuu siinayaa inay helaan deeqaha ay NYS maamusho iyo deeqaha waxbarasho ee kaabaya qarashkooda tacliinta sare.
 - Dhammaan wixii xog ah ama sida loo codsado, booqo hesc.ny.gov/dream

Dimuqraadiyada

**Si aad uga ogaato xog dheeraad ah iyo doorashada
aasaasiga iyo sida ay u shaqeeyaan, daawo
fiidyoowga:**


- Af Ingiriisi: youtu.be/-F-xuJ04NpI
- Af Isbaanish: youtu.be/kkaEnGIk-pY

Isku diiwaangeli si aad u codayso

- Waad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso haddii aad tahay da'da 16+, muwaaddin Maraykan iyo deggane NY ugu yaraan 30 maalmood kahor doorashada.
 - Haddii aad tahay da'da 16 ama 17 jir, hore ayaad isku diiwaangelin kartaa inaad codayso laakiin ma codayn kartid ilaa aad noqonayos da'da 18.
 - Iskuma diiwaangelin kartid inaad codayso haddii aad xabsi ugu jirto dambi lagugu xukumay ama ay xaakin maxkamad u gartay in aadan maskax ahaan karin arrintaas.
- Guddida Doorashooyinka NYS: www.elections.ny.gov/VotingRegister.html
- Guddida Doorashooyinka NYC: vote.nyc/page/register-vote
- Iska diiwaangeli onlayn (haddii aad haysato Ruqsada Darawalka NYS, Oggolaan ama Aqoonsi Aan Darawal ahayn): voterreg.dmv.ny.gov/MotorVoter
- Ku weyddiiso telefoon ahaan is diiwaangelin foom waraaq ah (oo lagu heli karo Ingiriisi ama Isbaanish): 1-800-FOR-VOTE (1-800-367-8683)
- Ma hubtid miyaa inaad u diiwaangashan tahay inaad codayso? Ka hubi heerkaaga isdiiwaangelinta codbixiyaha barta voterlookup.elections.ny.gov

Xuquuqdaada xaga cod bixinta

- Cod bixiyayaashu waxay booqan karaan MID KASTA oo Xarumaha Codaynta Hore ah gudaha wadanka halka ay degen yihiin, laga reebo Magaalada New York, halka cod bixiyayaasha loo magacaabay hal cinwaank ilaa HAL goob codaynta hore ah.
- Haddii aad rumeysan tahay cod-bixiye xaq u leh oo aad isdiiwaangalisay waqtigii lagu codeyn lahaa, laakiin magacaaga aan laga helin liiska cod-bixiyayaasha, waxaad codsan kartaa warqadda ku-meel-gaarka ah ama dhaarta.
- Ma bixinaysid Aqoonsi xaga laga codaynayo xataa haddii aad tahay cod bixiyahii u horeeyay.
- Weli waad codayn kartaa haddii aad la kulmayso hoy la'aan.
- Duruufaha qaarkood, weli waxaad u qalmi kartaa inaad codayso haddii lagu helay dembi.
- Wax badan oo shuruudaha u qalmida ah: nycvotes.org/how-to-vote/voting-rights
- Qaar ka mid ah shaqaalahu gobolka New York State ayaa u qalma inay helaan illaa laba saacadood lacagta shaqada lagu siiyo si ay u codeeyaan. Fiiri bal inaad uqalanto: www.elections.ny.gov/NYSBOE/elections/TimeOffToVoteFAQ.pdf



Dhaqaalaha



Barnaamijka Deeqaha Haynta Shaqaynta ee loogu talagalay shaqaalaha daryeelka carruurta

- Taariikhdu markay ahayd 31ka bisha Maajo, 2023, Gudomiye Hochul waxay ku dhawaaqday \$500 milyan oo maalgashi si loo xoojiyo shaqaalaha ka shaqeeya daryeelka carruurta ee New York iyada oo loo marayo Barnaamijka Deeqaha Haynta Shaqaalaynta (Workforce Retention Grant Program).
- Maalgelinta barnaamijka ayaa taageeri doonta 150,000 shaqaalaha ka shaqeeya daryeelka carruurta wawaana loo isticmaali karaa in lagu bixiyo gunnooyinka u dhexeeyya \$2,300 ilaa \$3,000 shaqaalaha ku jira doorarka daryeelka, iyo sidoo kale in la shaqaaleysiyo shaqaale cusub, bixinta gunnooyinka saxeexa iyo gudbinta, iyo in ka badan.
- Deeqda Shaqo Ku Heynta Shaqaalaha waa hal deeq, oo ka kooan laba qodob. Lacag Dheeraad ah oo lagu ixiyo ku nagaashaha shaqaada iyo Gargaar Kharashka Qorista Iyo Canshuurta Mushaharka
- Barnaamijka canshuur dhaafka caruruut ee ka soo baxa shuruudaha oo kaliya ayaa codsan kara. Qofka shaqaalaha ah ma codsan karo.
- Si aad uga soo baaxdo shuruudaha waa in aad cadeysaa:
 - In aad leedahay leesin aan dhicin, diiwaanka, ama ogolaashaha in aad caruur heyn karto.
 - In ay goob tahay mid furan oo “dhibaato xaggaa sharciga ah aysan heysan”.
 - Ugu yaraan ay hayaan hal ilmo ah oo aan qaraabo la aheyn qofka adeegga bixinaya ama shaqaalaha.
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo cosado, soo booqo ocfs.ny.gov/programs/childcare/grants/workforce-grant.
- Codsiyada waxaa la qabanayaa 26 Luulyo ilaa 15 Siteembar 2023.

Mushaharka ugu yar ee cusub ee shaqaalaha NYC ee cuntada

- Lacagta ugu yar ee ay ku shaqeeyaan dadka cuntada geeya guryaha ee isticmaala barnaamijka kombiyutarada ee NYC (\$17.96 saacaddii, oo uusan ku jirin baqshiishka) ayaa lagu talo jiray inuu dhaqan galoo 12 Luulyo 2023.
- Hase yeshee, ka dib markii shirkadaha cuntada guryaha geeya ee DoorDash, Grubhub, Uber, iyo Relay soo gudbiyeen dacwad ay doonayan in ay ku joojiyaan sharcigan cusub, qaali Maxkamadda Sare ee Manhattan ayaa soo saaray amar si ku meel gaar ah loogu hakinayo fulinta sharcigan. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in hakad la galley lacagta ugu yar ee ay ku shaqeeyaan dadka guryaha cuntada geeya.
- Xogtii ugu dabeysay, kala soco nyc.gov/DeliveryApps.

Garo Xuquuqdaada

Xubnaha bulshada iyo xulafada waa inay ka feejignaadaan xuquuqdooda mar kasta oo ay la macaamilayaan Socdaalka iyo Dhaqangelinta Kastam (ICE), Ilaalada Xuduudaha, ama sharci fulinta kale.

Haddii ay ku joojiyaan laanta socdaalka ama sharci fulinta kale ay ku joojiyaan, xusuusnow:

- Isdeji. Ha ka ordin. Ha iska caabin ama ha hor istaagin sarkaalka.
- Been ha sheegin, hana tusin dukumeenti been abuur ah.
- Waxaad xaq u leedahay in aad diido. Wax kasta oo aad tiraahdo waa laguu adeegsan karaa.
- Haddii wakiilku ku weydiyo inay ku baari karaan adiga ama alaabtaada, waxaad xaq u leedahay inaad tiraahdo maya.
 - Si kastaba ha noqotee, jir ahaan iskama caabin kartid.
 - Boolisku waxa laga yaabaa inay jirkaaga baaraan haddii ay hub ka shakiyan.
- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah oo wakiilka socdaalka uu ku codsado sharcigaaga socdaalka, waa inaad tustaa haddii aad wadato.
- Haddii lagu joojiyo, lagu xiro, ama lagu dhibaateeyo sharci fulinta, isku day inaad hesho wakiilka(yada) magaca, lambarka, iyo maclumaad kasta oo lagu aqoonsan karo.
- Adiga ama qof kale oo bulshada ka tirsan sharci fuliyaha waxa aad qaadi kartaan fiidiyow ama cod duube ah waraysiga isdhixgalkiisa. Sidoo kale waxaad qori kartaa wixii dhacay ka dib markay baxaan.
- Waa sharci darro in saraakiisha sharci fulinta ay sameeyaan joogsi kasta, baaritaan, xarig, ama masaafurinta ku saleysan midabkaaga, asalkaaga, diintaada, jinsigaaga, ama qowmiyaddaada.

Waxaad u sheegi kartaa isdhixgalka wakiilada federaalka Mashruuca Difaaca Soogalootiga (Immigrant Defense Project (IDP)).
IDP sidoo kale waxay siisaa maclumaad sharci ah iyo u gudbinta muhaajiriinta la xiray, tigidhada laga jaray, ama lagu helay dambi. Wac 212-725-6422 ama iimayl u dir info@immdefense.org.



Goobaha Gaarka ah

- Gurigaaga iyo "goobaha gaarka ah" (sida meelaha shaqaalah-kaliya loogu talagalay ee goobaha shaqada) waxay wataan ilaalin gaar ah oo goobaha dadweynuhu aanay samayn. Saraakiishu waxay geli karaan oo keliya meelaha gaarka ah haddii ay oggolaanshahaaga helaan ama ay ku tusaan waaran garsoor (uu saxeexay garsoore).

Goobaha la Ilaaliyo

- 27ka bisha Oktoobar, 2021, Waaxda Amniga Gudaha (Department of Homeland Security) waxay soo saartay siyaasad cusub oo xaddidaysa tallaabooyinka dhaqangelinta ICE iyo CBP gudaha ama ku dhow "meelaha la ilaaliyo."
- Tusaalooyinka meelaha la ilaaliyo waxaa ka mid ah, balse kuma koobna oo kaliya: dugsiyada iyo xarumaha kale ee waxbarashada ama munaasabada, xarumaha daryeelka caafimaadka, goobaha cibaadada, meelaha ay carruurtu isugu yimaadaan, goobaha adeegyada bulshada, xarumaha musiibada ama xaaladaha degdegga ah, xafladaha sida aroosyada iyo aaska, iyo bannaanbaxyada dadweynaha sida dhoolatusyada iyo isu soo baxyada.
- Gobolka New York, wakiilada socdaalka federaalku kama soo xiri karaan dadka, ama aadaya ama ka baxaya, gobolka, magaalada, iyo guryaha maxkamadaha dawlada hoose, amar maxkamadeed la'aanteed.

Ka digtoonow khiyaanada socdaalka

- Waa inaad kaliya la hadashaa qareen ama Waaxda Caddaaladda (DOJ) wakiil la aqoonsan yahay si uu talo sharci ugu helo xaaladdaada.
- Weligaa caawimaad ha ka qaadan socdaal "notario", wakiilka socdaalka, diyaariyaha cashuuraha, foomamka diyaariya, ama nootaayo. Gudaha Maraykanka, "notario" qareen ma aha!

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo kiiskaaga ama aad qabto wax su'aalo ah ee socdaalka guud, wac khadka tooska ah ee Xafiiska Maraykanka Cusub 1-800-566-7636.

Dembiyada

Nacaybka ah

Bilahii u dambeeyay, waxaa jiray warbixino sii kordhayay ee demiyada nacaybka ku lidka ah xubnaha bulshadda muhaajirka.

Waa maxay dembiga nacaybku?

- Dembiga nacaybka waa demb ay dhiirigeliso eexdu.
- Qofku waxa uu galaa dembiga nacaybka marka mid ka mid ah dembiyada ka caddeeyay la galo ee beegsanaya dhibanaha sababtoo ah fikirka ama rumayn ku saabsan isirka, midabka, asalka qaranka, tafiirta, sinjiga, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, naafanimada ama qaabka galmaada, ama marka falkan loo galo iyaddoo ay keentay nooca fikirka la qaba ama waxa laga aaminsan yahay qofka.
- Badhasaab Cuomo waxa uu sameeyay Kooxda hawlalka Degdega ah ee Dembiyada Nacaynka si ay ula dagaalamaan warbixinaha kordhaya ee eexda oo ay dhiirigeliso hanjabaado, dhibaatayn iyo rabhsad ka dhacda Gobolka New York oo dhan.
- Marka laga warbixiyo dembiga nacaybka, dhammaan macluumaadka ku saabsan waayo aragnimadaada, aqoonsiga, iyo waxa kale waxay ahaadaan qarsoodi.

Haddii aad aragto shay ama aad tahay dhibaha dembiga nacaybka, uga warbixi booliska oo soowac Qaybta Xuquuqda Aadamaha ee NYS. Soo wac 1-888-392-3644 ama Fariin qoraal ah ugu dir “HATE” lambarka 81336.

Haddii adiga ama qof aad garanayso uu ahaa dhibanah dembiga, Xafiiska NYS ee Adeegyada Dhibanaha waxa uu awoodi karaa inuu kaa caawiyo biillashada caafimaadka iyo la talinta kharashyada, aaska iyo kharashyada geerida aaskeeda, mushaharka lumay, iyo noocyada kale ee caawimada. Soo wac 1-800-247-8035 ama booqo ovs.ny.gov.


Dadka degen NYC iyo wadamada ku xeeran

Gudaha NYC:

- Qareenka dad waynaha
 - 212-669-7250
- Qareenka Degmadda Manhatan
 - 212-335-3100
 - manhattanda.org/victim-resources/hate-crimes
- Qareenka Degmadda Brooklyn
 - 718-250-4949
 - brooklynda.org/hate-crimes-bureau
- Qareenka Degmadda Queens
 - 718-286-6000
- Guiddida Xuquuqda Aadamaha NYC
 - 718-722-3131
 - nyc.gov/cchr
- Aga Badbaada ah ee Caawimada Dhibanaha
 - 1-866-689-4357

Ka baxsan NYC:

- Qareenka Degmadda Nassau
 - 526-571-3505
 - nassauda.org
- Qareenka Degmadda Nassau, Xafiiska Arrimaha Muhaajirka
 - 516-571-7756
- Hawl fuliha Degmadda Nassau Laura Curran
 - 516-571-3131
- Qareenka Degmadda Suffolk
 - 631-853-4161
 - suffolkcountyny.gov/da
- Degmadda Suffolka Waaxda Booliska, Qaybta Dembiyada Nacaybka
 - 631-852-6323
- Degmadda Suffolk, Waaxda Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay
 - 631-853-4738
- Degmadda Westchester, Guiddida Xuquuqda Aadamaha
 - 914-995-7710
 - humanrights.westchestergov.com



Ilaha NYS



Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub

- Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu u baahan yahay caawimada sharciga soo wac khadka tooska ah [1-800-566-7636](tel:18005667636). Dhammaan macluumaadka wicitaanku waa qarsoodi. Caawimada waxaa lagu heli karaa 200+ luqaddoo.

Waaxda Caafimamadka NYS

- Macluumaadka u dambeeyaa ee safmarka COVID-19, soo wac khadka tooska ah [1-888-364-3065](tel:18883643065) ama booqo ny.gov/coronavirus.
- Hel xaqiyooyinka tallaalka COVID-19 gudaha New Yorka bogga ny.gov/vaccine.
- Codso daboolida caafimamadka: soo wac [1-855-355-5777](tel:18553555777) ama booqo nystateofhealth.ny.gov.

Xafiiska Caafimaadka Maskaxda NYS

- FSu'aalaha dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda ama si aad u hesho adeeg bixiyaha adeega caafimaadka maskaxda, soo wac [1-800-597-8481](tel:18005978481) ama omh.ny.gov.
- Haddii aad la kullanto walbahaar uu sababo gurmadka korona fayraska, soo wac [1-844-863-9314](tel:18448639314).
- Laynka Qaranka tooska ah ee Ka hortagga Isdilada: Haddii noloshaada ama qof kale noloshiisu ay khatar wayn ku sugar tahay, soo wac [911](tel:911). Haddii aad ku jirto dhib oo aad u baahan tahay caawimo degdeg ah, soo wac [1-800-273-8255](tel:18002738255) ama fariin Qoraal ah ugu soo dir "GOT5" ilaa [741-741](tel:741741).
- Rabashada Guriga: haddii adiga ama qof kale uu xidhiidh la leeyaha uu ku maamulayo qof kale hadal, qaab dagaalansan, ama xad gudub galmo, ama farsamooyin kale, soo wac NYS Domestic Violence Hotline lambarka [1-800-942-6906](tel:18009426906).

Waaxda Shaqada NYS

- Waaxda Shaqada NYS waxaa ka go'an ilaalinta iyo sare u qaadida badbaada shaqaalaha iyo caafimamadka, mushahrka, iyo xaaladaha shaqada.
- Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan mushaharka iyo sharciyada saaada, caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ama ku soo xaree cabasho, soo wac [1-888-469-7365](tel:18884697365) ama booqo dol.ny.gov/safety-and-health
- Wixii ah caawimada Caymiska Shaqo la'aanta, wac [1-888-209-8124](tel:18882098124) ama booqo dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance.

Qaypta Xuquuqda Aadamaha NYS

- Sharciga Xuquuqda Aadamaha New York waxa uu mamnuucaa takoorka dhinacyada sida shaqada, guriyaynta, amaahda, waxbarashadda, iyo meelaha hoyga dad waynaha, oo ku salaysan da'da, isirka, asalka qaranka, sinjiga, qaabka galma, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, heerka guurka, heerka ciidaanka, iyo dabaqadaha kale.
- Haddii aad dareemayso in lagu takoroay, ku soo xaree cabashada [1-888-392-3644](tel:18883923644) ama booqo dhr.ny.gov.

Ilaha COVID-19 Magaalada New York

- Dadka degen NYC ee raadinaya adeega adeeg bixiyayaasha ama ilaha kale waxay ka heli karaan diwaanada hoose:
 - Waxbarshadda: nyic.org/covid-education-resources
 - Shaqada: nyic.org/covid-employment-resources
 - Dhaqaalaha: nyic.org/covid-financial-resources
 - Cuntadda: nyic.org/covid-food-resources
 - Daryeelka Caafimaadka: nyic.org/covid-healthcare-resources
 - Ganacsiga yar: nyic.org/covid-small-business-resources

Dukumentiga qatka internetka ka fiiri ama luqado
kale iyadoo lagu qoray, booqo nyic.org/KYR ama
calaaamaddan iskaangaree:



Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku
saabsan agabkan ama macluumaadka ku jira,
fadlan la xidhiidh:
Bryan Lee – blee@nyic.org

Haddii aad dooneyo in aad qabato kulan lacag
la'aan ah ee Ogsoonoow Xuquuqdaada oo loo
qabto kooxaha bulshada, fadlan la soo xiriir:
kyr@nyic.org

Isbahaysiga Laanta Socdaalka New York (NYIC)
waa xeerka dalaayad iyo urur u doodis ah ah
oo metela in kabadan 200 oo muhaajiriin ah
iyo kooxaha xuquuqda qaxootiga dhammaan
New York.

Waxaa noo muuqda Gobolka New Yorka oo ka
xoog badan sidii hor esababtoo ah dhammaan
dadka waa la soo dhawaynayaa, waxaa loola
dhaqmaa si xaq ah, oo waxaa la siiyaa fursada
ay ku raacdeeyaan riyooinkooda. Hiigsigayagu
waa inaan midayno muhaajiriinta, xubnaha, iyo
gaanshaan buurta markaad dhammaan dadka
reer New York way samaadaan.



New York Immigration Coalition

131 W 33rd St, Ste 610
New York, NY 10001
212 627 2227
nyic.org